

Warbixinta Kaalmada Kharashaadka ee Children's Minnesota

Children's Minnesota waxay dadka ku caawinayaan bixinta kharashka. Waxaa naga go'an in aan ilmo kasta daaweyno, oo aanan u eegin in ay lacagta iska bixin karaan. Sida sharciga ah kaalmada dhaqaalaha waxaa heli kara bukaanka u qalma daryeel iyo adeegyo caafimaad oo degdega ah ama wixii caafimaad ahaan lagama maarmaan u ah.

Kaalmada Children's waxaa lagu bixin karaa kharashka adeegyada daryeelka caafimaadka degdega ah iyo adeegga lagama maarmaanka ah.

Yaa xaq u leh kaalmada dhaqaalaha?

Bukaanka markay:

- Soo buuxiyaan "Codsiga Kaalmada Kharashaadka ee Children's"
- Xaq u yeeshaan ee uu codsioda soo go'aamiyo Xafiiska Talabixinta Dhaqaalaha.

Waa maxay noocyada kaalmada dhaqaalaha ah ee la heli karo?

Haddii bukaanku haysto ceymis, waxay xaq u yeelan karaan qiimadhimis dheeraada oo ah 30% kharashkii bukaanka:

1. Markuu dakhliga qoyska ka yar yahay 350% ah federal poverty guidelines (heerka saboolnimada Federaalka) ("FPL")
2. Markay qoysku keenaan caddeymaha la iska rabo oo dhan si loo xaqiijiyo dakhliga

Bukaanka aan haysan ceymis ama aan heli karin si ay isaga bixiyaan adeegyada caafimaadka ee lagama maarmaanka u ah, waxa ay xaq u yeelan karaan qiimadhimis:

1. Haddii uu dakhligooda sannadkii ka yar yahay \$125,000
2. Markuu dakhliga qoyska ka yar yahay 350% ah federal poverty guidelines (heerka saboolnimada Federaalka)
3. Markay qoysku keenaan caddeymaha la iska rabo oo dhan si loo xaqiijiyo dakhliga

Bukaanka waxay xaq u yeelan doonaan qiimadhimis ah wax aan ka badnayn kharashka la iska rabo guud ahaan; hadda qiimadhimistu waa 59% ah isbitaallada iyo kilinigyada isbitaallada, 47% waa kilinigyada caadiga ah.

Sida loo codsado kaalmada kharashaadka ee Children's Minnesota

La-taliyeyaasha kaalmada ayaa diyaar u ah in ay dadka ka caawiyaan wixii walaac ah oo la xiriira kharashka caafimaadka oo waxaa loo marayaa habraaca kaalmada dhaqaalaha. Taleefan ayaad u soo diri kartaa, xafiiska ayaad imaan kartaa, ama codsiga kala soo deg barta internetka oo noogu soo dir boostada. Codsiyada waxaa lagu heli karaa afafka Isbaanishka, Moong, Soomaali, Ruush, Kaaren, Carabi iyo Fiyetnaameys.

Fadlan ogow in codsiga laga soo shaqeyn doono 2 ilaa 3 toddobaad. Waraaq ayaa lagu soo diri doonaa marka go'aanka la soo gaaro ama haddii lagaaga baahdo macluumaad dheeraad ah.

Children's Minnesota – Financial Counseling

Taleefanka: 612-813-6432

Fakis: 612-813-6461

Cinwaanka Xafiiska:

Financial Counseling #17-750,
Children's -Minnesota
2545 Chicago Ave S
Minneapolis, MN 55404

Marka aad imaaneyso: Imow Miiska Soo-dhaweynta
ee Laba Dhisme ee Isbitaalka